

Tilmaamaha la Raacayo ee Liiska Daawooyinkega

1. MARWABA WAA INAAD HEYSATAA FOOMKAN. Haddii aad doontid, inta aad foomka isku laabto ku rid boorsada yar ee jeebka ee aad ku ridato ruqsadda baabuurka (gaariga) lagu wado. Taas oo sahleysa in liiska la helo haddiiba ay dhacaan wax deg degga.
2. Qor dhammaan daawooyinka aad qaadato iyo dhammaan wixii xassasiyado ah ee aad leedahay. Ku dar maclumaadka la xiriira daawooyin aad ku qaadatay rugaha cafimaadka, isbitaalada iyo meela kale ee daryeel cafimaad laga helo - iyo gurigaba.
3. Foomkaan waa inaad sidataa marwalba oo aad tegeyso rugta cagimaadka, farmashiyaha, isbitaalka ama dhakhtarka, ama daryeel bixiye kale.
4. DHAMMAAN WIXII ISBDEL AH EE DAAWOYINKAAGA LAGU SAMEEYAY KU QOR foomkaa dushiisa. Haddii aad joojisid qaadashada daawo, qor taariikhda aad joojisay. Haddii aad u baahato cid ku caawisa, weydii dhakhtarkaaga, kalkaliyaha, farmashiistaha, ama qof qoyskaaga ah oo kaa saacida in liiska daawada marwalba la cusbooneysiye.
5. Safka ay ku qoran tahay “Xusuusaha”, ku qor sababta aad daawada u qaadato (Tusalooyin: dhiig kar, sonkorow, kolostoroolka oo kacsan).
6. Marka isbitaalka laga bixiyo, qof ayaa kaala hadlidoona daawooyinka aad qaadan doontid iyo kuwa lagaa joojiyey. Madaama wax badan iska bedelaan daawooyinka qofka marka uu isbitaal galo, liis cusub ayaa laga yaabaa in la buuxiyo. Marka aad dhakhtarkaaga ku noqoto, horay u sii qaado liiska daawooyinkaaga. Taas waxay qof walba ka caawineysaa inuu ogaado liiskaaga daawada ee cusub.

Sidee buu foomkan kuu caawin karaa?

- Foomkaan wuxuu adiga iyo xubnaha ka tirsan qoyskaaga xusuusinayaa daawooyinka aad qaadato.
- Foomkan wuxuu siinayaa dhakhaatiirtaada iyo daryeeyaasha kaleba DHAMMAAN daawooyinka aad hadda qaadato. Waxay u baahan yihiin inay ogaadaan daawooyinka geedaha/dhirta laga sameeyo, fiitamiinada iyo daawooyinka qofka iskiisa uu u soo iibsado ee aad qaadato!
- Maclumaadkaan haddii ay helaan, dhakhaatiirta iyo daryeel bixiyeyaasha kale waxay ka hortegi karaan dhibaatooyin cafimaad oo ka iman kara khilaaf ka dhex dhaca fal galka ay dawooyinka kala duwan ay keeni karaan.



Haddii aad rabto koobi ah qoraalka Liiska Daawadeyda iyo buuga yar ee aad ka heli karto maclumaad dheraad ah , booqo boga internetka ee Kooxda Menesoota ee Isu Bahaysatay Badbaadada Bukaanka, www.mnpatientsafety.org ama telefoonka (651) 641-1121.